

## **Fariinta Kormeeraha Guud**

**8/12/2022**

Bulshada CCS ee qaaliga ah,

Sida aad horeba u ogeyd, Ururka Waxbarashada Columbus (CEA) - ururka shaqaalaha oo mataleya macalimiinteenaa iyo shaqaalaha shatiga/shahaadada u-leh – waxa ay soo saareen Ogeysiis ku saabsan shaqo joojin laga bilaabo 22-ka Agoosto, 2022. Inkasta oo taasi aysan macnaheedu ahayn inay jiri doonto shaqo joojin, waxay ilaalinaysaa xaqa ay CEA u leedahay inay sidaas samayso laga bilaabo Isniinta, taas oo dhalinaysa su'aalo ku saabsan bilowga jadwalka sannad-dugsiyedka.

Hubanti la'aantan sii kordheysa, waxaan ogahay in qoysaskeena ay raadinayaan jawaabo. Waxaa naga go'an inaan sameyno wixii aan awoodno si aan iyaga usiino jawaabno. Ahmiyadeenu waa inaan u adeegno ardaydeena iyo qoysaskeena iyo inaan hubino bilawga bad-qabka leh iyo guuleysiga sanadka.

In kasta oo aan ku rajo weynahay xallinta wakhtiga iyo in aan soo dhaweyn karno soo laabashada macalimiinteenaa iyo ardaydeena ee 24-ka Agoosto, waxaan isku diyaarineynaa suurtagalmimada curyaaminta/khal-khal gelinta.

Toddobaadkii hore waxaan sheegay inay tahay inaan u diyaargarowno xaalad kasta, waxaan idinla wadaagay macluumaadka ku saabsan [Xarunteena \(Hub\) ee Dib-Ugu-soo laabashada Dugsiga \(Back-to-School Hub\)](#) iyo [Dib-Ugu-soo noqoshadeena Carwada/Bandhiga Dugsiga ee ilaha/Kheyraadka Qoyska \(Back-to-School Family Resource Fair\)](#), taas oo aan wali qaban doono 20-ka Agoosto.

Toddobaadkan, waxaan wadaagaynaa macluumaadka iyo agabka/ilaha/khayraadka haddii ay dhacdo shaqo-joojin CEA ah. Mar labaad, inkastoo aan rajeynayo in albaabadeena ay u-furmaan sidii loo qorsheeyay, waxaan rabaa inaan hubiyo in qof walba uu diyaar u yahay dhammaan xaaladaha suurtagalka ah.

Waxaan abuurnay [bogg Macluumaadka Furitaanka Beddelka ah, oo ku yaal Xarunta Ku-noqoshada Dugsiga \(Alternative Opening Information page\)](#), halkaas oo aad ka heli karto FAQs, haqab-tir-warbixineed, iyo wax kasta oo aad u baahan tahay inaad ogaato. Xogtu way sii socon doontaa in la cusboonaysiyo marka loo baahdo waana inay kaa caawiso inaad diyaargarow muhiim ah u samayso ardaygaaga iyo qoyskaaga.

Si daacad ah,

Talisa Dixon  
Kormeeraha guud/gudoomiyaha, Dugsiyada Magaalada Columbus